

Yaad wici markaad u baahatid caawimo guri?

Xoojinta bulshada iyada oo lala shirkayo kuwa degan, xaafadaha iyo ganacsatada si looga dhigo magaalada mid ammaan iyo caafimaad badan cidalbana soo dhowaysa

Bulshadayada kiraystayaashu waa muhiim! Haddii ay jirto arrin la xiriirta hooyga aad kiraysatay, bal qof uun u soo sheeg si ay wax looga qabto sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ah

Hantiilaha

Wadahadalka furani wuxuu daruuri u yahay xidhiidhka fiican ee ka dhexeeya milkiilaha iyo kiraystaha. Milkiilayaasha intooda badan way soo jawaabaan waxayna diyaar u yihiin sameeynta dayactirada laga codsado, markaa hubi inaad bilowodid la hadalka hantilaha ama maamulaha dhismaha. In aad haysatid nuqulo ama qoratid taariikhaha aad la xadhiidhay waxa ay kaa caawinaysaa la socotid waqtiyada aad gargaarka codsatay.

311

Haddii hantiilulu wax ka qaban codsigaagii, ama aad qabtid su'aalo ku saabsan sharciyada guryaha, wac 311. Waa muhiim in aad siisid kormeeraha macluumaad kaaga si uu kuula socodsiiyo marba meesha wax marayaan. Waxa kale oo aad samayn kartaa warbixin 311 iyo in aad ka heshid macluumaadka code guryaha boggayaga <http://www.minneapolis.gov/inspections/>.

Gargaar deg deg ah

Haddii xaaladaha dhismahu adiga ama dadka kale halis gelinayso, ka tag dhismaha wacna 911. Haddii ay jiraan dayactiro u baahan in si dhakhsa ah wax looga qabto, sida kulka ama biyo la'aanta, hantiluhuna dhakhsa kuugu soo jawaabin, wac 311. Arrimaha ammaanka nolsha waa la soo hor mariyaa si kormeeruhu daba gal ugu sameeyo sida ugu dhakhsaha badan. Haddii aad rabtid in aad soo sheegtid dab la'aan waqti ka baxsan saacadaha sheeqada ee 311 ka, wac 911 si aad u wargelisid kormeeraha.

Waaxda Xuquuqda Madaniga

Haddii kirayste, shaqaale, ama macaamiil si xun loola dhaqmo sababtuna tahay xagga jinsiyadda, diinta, jinsiga, aqoonsiga jinsiga, hanaan-jinsi, asal qaran ama (qowmiyadda), taas waa ku xadgudub sharciga. Haddii aad aaminsan tahay in lagu takooray gudaha magaalada Minneapolis la xidhiidh Waaxda Minneapolis ee Xuquuqda Madaniga oo wac 612-673-3012 ama bogga www.minneapolis.gov/civilrights ama tag 350 S. Fifth St., Room 239 Minneapolis, MN 55415.

Ururada gargaarka kiraystayaasha

Ururada sida HOME Line ama Legal Aid waxay ka caawiyaan kireysteyaasha xaga sharciyada iyo arimaha guud ee guryaha sida; ka saaridda, dayactirka, ka xidhashada, Section 8, deebaajiga, lacagta soo noqota, cayayaanka guriga ku beerma iyo takoorka. Haddii aad qabtid su'aalo sharciga ah, wac khadka qarsoodiga ah: 612-728-5767 ama booqo bogga: www.homelinemn.org. Waxaad ka wici kartaa Legal Aid: 612-334-5970 ama booqo bogga: www.mylegalaid.org.

Ururada xaafada

Xaafadda iyo ururo bulsho oo badan ayaa kugu xidhi kara khayraad wax tar leh ama kireystayaal ay haysataan arimahaaga oo kale. Waad u sheegi kartaa hadii hantiluhu hawl fttcan qabto; wadaaga fikradaha qof kasta wax bayartaa. Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ururka xaafadaada, booqo: www.minneapolis.gov/ncr, ama wac 311.

HousingLink

Bogga kombiyuutarka ee HousingLink wax laga helaa liiska guryo la awoodi karo oo bannaan iyo liisyada la sugayo inay furmaan ee Minneapolis, St. Paul, Twin Cities, Minnesota oodhan. Booqo bogga HousingLink: www.housinglink.org.